



## **Xasuuq-rorka HOPE Elementary ee loo rabo Turjumada**

### **OGEYSIISKA MUDDADA FALANQAYNTA DADWEYNAHA EE DHAGEYSIYADA LA-XISAABTANKA EE SOO SOCDA EE KULANKA GUDDIGA WAXBARASHADA GOBOLKA COLORADO EE NOOFEEMBAR**

Guddiga Waxbarashada ee Gobolka Colorado waxay ka raadinayaan talo qoysaska, shaqaalaha dugsiya iyo xubnaha bulshada dhageysiyada la-xisaabtanka ee soo socda ee Golaha Waxbarashada HOPE Online Learning Academy Elementary ayaa waxaa oggolaaday Degmada Douglas. Xubnaha dadweynaha waxay:

- Xubnaha dadweynaha ayaa faallo ka bixin kara hirgelinta tallaabooyinka horay loo dalbaday (sida dugsiya isu beddelay tan iyo xagaaga 2017) oo
- ay bixiyaan tallooyin ku saabsan ficillo dheeraad ah oo uu maamulku hogaaminayo (waxa loo baahan yahay in la sameeyo si horey loogu sii socdo).

Sanadkii 2017, iyada oo qayb ka ah nidaamka wareega xisaabtanka, Golaha Waxbarashada Gobolka wuxuu faray HOPE Online Learning Academy Elementary in ay la shaqeeyaan lamaane maareyn ah oo ay dib u dhisaan guddigooda maamulka.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan wareega xisaabtanka, fadlan eeg: [CDE Accountability Clock Fact Sheet](#). (Xaashida Xaqiiqda Saacadda ee La Xisaabtanka CDE)

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dhageysigii hore ee isla xisaabtanka ee dugsiyadan, oo ay kujiraan qorshihii lasoo gudbiyay 2017, fadlan booqo [State Board Accountability Actions webpage](#). (Websaydhka Waxqabadka La-Xisaabtanka ee Golaha Gobolka)

Faallooyinka ayaa loosoo gudbin karaa MID KASTOO KAMID AH siyaabaha soo socda:

- Adigoo buuxinaya [short online survey](#). (rayi ururin gaaban oo internetka ah)
- Adigoo imyl udiraya [state.board@cde.state.co.us](mailto:state.board@cde.state.co.us).
- Adigoo qoraal ugu gudbinaya Xafiiska Waxbarashada Gobolka: State Board Office, 201 E. Colfax, Room 500, Denver, CO 80203.

**Waqtiga kama dambeysta ee dhammaan faallooyinka qoran waa Isniinta, Noofembar 11, 2019 saacaddu markay tahay 12:00 PM (duhurkii). Faallooyinka waxaa soo diyaarin doona xafiiska Gobolka ee Waxbarashada oo loo diri doona dhammaan xubnaha Guddiga Gobolka.**



Dhammaan waxyaabaha la soo gudbiyo waxay qayb ka noqon doonaan diiwaanada rasmiga ah ee dhageysiyada oo si caan ah ayaa loo soo dajin doonaa. Faallooyinka lagu soo gudbiyo luqadaha aan Ingiriisiga ahayn waxaa loo turjumi doonaa Ingiriisiga markii waqtigu saamaxo. Faallooyinka la helay kadib waqtiga kama dambaysta ah laguma dari doono ama looma gudbin doono Guddiga Gobolka.

